Buuga Waalidiinta

Caruurta caawi, adkee oo toosi

Dieses Vorhaben wird aus dem Europäischen Sozialfonds der Europäischen Union und aus Mitteln des Bundesministeriums für Verkehr, Bau und Stadtentwicklung gefördert.

Buuga Waalidiinta

Dad badan wuxuu Qoyska ugu fadhiyaa qiimo aad u badan. Caruur in aad heshaa waxay anaga na siisaa Nasiib. Caruurtu Waa hadiyad qaali ah, isla markaana wada noolaanshaha Caruurta iyo anaga waxay nagu tahay hawl aad u wayn.
Waalidiintu waxay masuul ka yihiin Caruurtooda. Korinta caruurta waxaa marar badan lagala kulmaa Jaha- wareer: Waxa aan samaynayno ma wada saxbaa? Sida aan caruurta u korinayno ma si nasiib wacanbaa?, Seen caruurteena u bar-baarin karnaa?, Seen anagu caruurta si fiican ula dhaqmi karnaa? Suaalo badan iyo jaha-wareer ayaa waalidiinta madaxooda ka guuxaya.

Laga bilaabo 2010 ilaa 2012 waxy koox waalidiin ah(Arbeitskreis Elternarbeit) ay u shaqaynaysay mashruuca ABBA Projekt ee „Netzwerk Rope“ oo ku saabsan waxbarashada iyo shaqada ee Kranichstein (ESF- Bundesprogramm BIWAQ) ee Magaalada Darmstadt-Kranichstein.
Hawlaha waalidiintaas ay suurta galiyeen waxaa kam id ahaa wadahadalka walidiinta. Halkaas waxaa ku kulmaayay si joogta ah, koox waalidiin ah oo ka soo kala jeeday wadamo kala duwan oo kala af ah. Waxay ka wada hadlayeen, feker is dhaafsi ku saabsan waaya aragnimadooda, waxay isi siinayeen talooyin iyo tusaalooyin, way is baranayeen, waxayna is dhaafsadeen fikrado badan oo ku saabsan barbaarinta caruurta.

Suaalo muhiim ah oo kamid ah barbaarinta caruurta ayay kooxdaan waalidiinta ah Buugaan waalidiinta ku soo aruuriyeen. Run ahaantii waxaan isku daynay inaan jawaabo iyo tusaalooyin wanaagsan oo aad u caawiya waalidiinta u helno.
Buuga waalidiintu ma aha Rezebtbuch. Waxaa loogu talagalay inuu dhiiri geliyo sida caruurta loola dhaqmaayo in laga fekero. Wuxuuna waalidiinta buugaan siinayaa ama gacanta u gelinayaa warbixino dheeraad ah iyo halkii ay talooyin ka raadsan lahaayeen.
Qoraalka buugaan waxaan isku daynay inaan ku qorno hadal jilicsan oo aad loo fahmi karo. Kooxda waalidiinta ah ee „Eltern Arbeitskreises“ waxay buugaan ku turjumeen Luqadaha Carabiga, Ruushka,Soomaaliga,Turkiga iyo Urduga, si waalidiinta aan Afka jarmalka si fiican u aqoon ay u aqrisan karaan oo si fiican u fahmi karaan.

Netzwerk ROPE e.V. (Hg.) in Zusammenarbeit mit dem
Caritasverband Darmstadt e.V.: Elternreader.
Kinder unterstützen, stärken und fördern
AutorInnen: Mahizer Aydinyer, Maria-Antonia Estol, Syeda Quratulain Gardezi, Ibrahim Haji, Filiz Koç, Fathia Riahi, Anna Volkov
Redaktion: Maria-Antonia Estol, Syeda Quratulain Gardezi
Redaktion & Gestaltung: Sven Rasch | Umschlagfoto: Sven Strobel
© Netzwerk ROPE e.V. 2013 (2. Auflage)

Waxaan idiin rajaynayanaa in aad si wanaagsan ooga heli doontaan aqriskiisa.
Waa kooxdiinii waalidiinta ahayd ee Kranichstein

Dhibic ilaa dhibic

4 Caruurtu waxay u baahanyihiin waqti iyo fiiro gaar ah

5 Wada Hadlida

6 Amaan iyo dhiirigelin

7 Adkaynt Isku Filnaanshaha – Masuuliyad ku wareejinta

8 Xuuduudaha iyo Sharciyada

9 Si sax ah u dheh Maya / Hab dhaqan joogta ah, halkii Ciqaab ay ka noqon lahayd

10 Ha lagugu Daydo (Tusaale u noqo) / Cayaar, baro oo Fahan

11 Dhaq-Dhaqaaqa

12 Hawlmaalmeedka-waqtiga Firaaqada iyo caruurta / Qorshaynta waqtiga Firaaqada

13 Hab dhaqanka Isgaarsiinta: Telefishinka iyo kombiyuutarka

14 Cunuga Iskuulka

16 U dhaxayn gacan dabcin iyo ku xirnaansho: Xaalad gaar ah oo dhalinyarada qusaysa

17 Hayadaha muhiimka ah ee Kranichstein

19 Ururka Netzwerk ROPE e.V.

Caruurtu waxay u baahanyihiin waqti iyo fiiro gaar ah

Koritaanka iyo horumarka Caruurteena waxaa saamayn wayn ku leh isku xirnaanta u dhaxaysa waalidka iyo Cunuga. Waxaa taas cadeeyay Daraasado badan oo la sameeyay. Xiriir wanaagsan oo qoto- dheer oo u dhexeeya waalidka iyo cunuga , waxay cunuga siisaa isku kalsoonaan. Marka aan caruurteena fiiro gaar ah siino, oo aan hadalkooda xiiso ku maqalno, oo aan il naxariis leh ku fiirino, oo aan kalsoonaan kula xiriirino, waxaan ku caawinaynaa in aan barno is Ixtiraamka. Aqoonsiga aad aqoonsato cunuga waxay ka caawisaa in ay isku kalsoonaantiisa hormarto.

In badan oo anaga naga mid ah mahaystaan waqti badan oo firaaqo ah. waxaa muhiim ah in aan ogaano in aysan muhiim ahayn inta waqti ee aad caruurta la qaadatay, laakiin muhiimadu ay tahay in aan ogaano see waalidka iyo caruurtu waqtiga u wada qaateen. Wada ciyaarida, wada heesida, qadqatada, iyo wadasheekaysigu waxay xoojisaa xiriirka waalidka iyo Cunuga. Hadiii caruurtu dareemaan tixgelin iyo jacayl , taasi waxay hormarisaa iskukalsoonaantiisa iyo is hubidiisa. Kalmado jilicsan sida „aniga wann ku jeclahay adiga“, „ wann kugu kalsoonahay“, „ aniga wann ku aaminsanahay IWM, waxay suurta geliyaan wax wayn oo cajiib ah. Hadii anaga waalid ahaan aan caruurteena Aamino, ayaguna waxay ku kalsoonaanayaan kartidooda. Googaalaha iyo heesaha caruurta ad bay u jecelyihiin. Wadan walba iyo dhaqan walba waxa uu leeyahay heeso caruureed iyo googaale cadale uu Facba-Faca kale u gudbiyay. Wada heesida waxa ay isku xirtaa qoyska. Caruurtu waxay Heesaha iyo Sawirada ka dhexhelaan inay ka dhex fekeraan. Wada Heesida lagu soo celceliyo waxay caruurtu ka bartaan Xasuusta iyo wax Xafidida. Heesaha waxaa loo adeegsadaa in caruurta lagu aamusiyo ama xanaaqa looga tir-tiro, sidaa darteed waxaa loo adeegsadaa in caruurta lagu seexiyo.

Googaale-cadalalha faraha

- Suul Gambar, Murugsato, fardhexo, faadumo, faryareey
- Waylaha aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, Waylaha aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, Ceelka qaraar ka duwee, ceelka macaan ku du. Qat qat qat qat qat qat qat.
- Waylaha aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, Waylaha aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, aroori, Ceelka qaraar ka duwee, ceelka macaan ku du. Qat qat qat qat qat qat qat qat qat.

www.youtube.com [▶ Maaweelada Caruurta (original)]

Maaweelada Caruurta

1. Maaweelo fiican, macaane hooyo iyo Aabe Macalinow ii sheega. Maaweelo fiican, murtidiina ii dhiga, madaxayga weeyaane

2. Hooyo Ha waayin hooyo wax ku siisa, ha waayin, hooyo ha wayin waalala dhawra, hooyo ha waayin soomaliwaynta, ha waayin, Hooyo, ha waayin soomali waynta.

3. Huwaaya huwaaya, hooyadaa ma joogto, aabahaa ma joogo, kor iyo koonfur aaday, kabaheedi qaadatay, Huwaaya huwaaya, Hurdooy Hurdooy kaalay, hurdo macaaneey kaalay, indhaheeda shab ku dheh, shar cal ku dheh

4. In hiyeey inhiyeey, ma cadee ha cadaado, caano geel ha ka cadaado, culumaa cuni doonta iyo caalin wadaad ah,iyo reer curadkiisa, gacalooy gacalooy, gacanteey midigeey, midii aan jeclaayeey.

Wada Hadlida

Si Cunugu u barto Hadalka ama luqada waxa uu u baahanyahay Qof si joogta ah oo galgacal ku dheehan ula hadla oo si dulqaad leh u dhagaysta.Ilmaha yar ama cunugu waa in uu hadlaa oo uu baahidiisa sheegaa. Wada hadal xiisa leh, u sheekayn iyo Buug u aqrin iyo Heeso ku wada heesid waxay ay Cunuga ku hagaajisaa inuu kugu daydo oo kaa daba sameeyo.

Caruurtu waxay awoodaan in ay hal mar luqado kala duwan bartaan. Waxaa muhiim ah in ay waalidiintu caruurta kula hadlaan luqada ay sida fiican u yaqaanaan. Luqado isku qasmo ama hadalka oo cunuga ka daaha waa in aysan waalidiintu ka walwalin. Si degan oo loo wada hadlo waxay muhiim u tahay horumarka cunuga iyo farxad kuwada noolaashaha qoyska. Hadii mar walba la is tusiyo Rabitaan iyo Xiiso, waxay taasi sababtaa in la is ixtiraamo.

Marka hadal la dhahaayo, waxaa muhiim ah in laga fiirsado sida loo dhahaayo. Sidaas waxaa si wanaagsan ugu soconaayo in si fiican loo wada sheekaysto, waxaa fiican in marka aad la hadlayso cunugaada aad indhaha ka fiirisid, intii aad gadaashiisa ka hadli lahayd, ama adiga oo qol kale ku jira aad wax u sheegi lahayd. Si fiican ayaan u dhagaysanaa, oo aan u maqalnaa marka qof si degen oo ixtiraam leh noola hadlo, laakiin hadii qof si xun noola hadlo ama nagu qayliyo ma dhagaysano hadalkiisa.

Waxaad cunuga ula hadashaa si toos ah. U gudbi Cunuga fariintaada, waxa aad ka fakarayso iyo sida aad wax u dareemayso, adoon cunuga ku qaylinin ama caayin. Tusaal. „ waan daalanahay oo hada waxba ma kuu aqrin karo“ waa ay ka fiicantahay hadii aad tiraahdo „waad iga xanaajinaysaaye kor ii dhaaf“.

Sida waalidku uu caruurtiisa iyo qoyska dhexdiisa uu inta badan ugu dhex hadlo dareenka iyo sababaha keenay, ayay caruurtana si wanaagsan uga baranayaan oo ay dadka kalena kula dhaqmayaan. Kartidaan waxay muhiim u tahay is fahmaka qoyska iyo waliba waqtiga dambe is fahmka cunuga iyo iskuulka ama shaqadiisa dambe.

Hadii aad rabto in aad cunugaada la hadasho, waa in Kombiyuurka iyo Telefishinka ay dansanaadaan, si aad uga hortagto in Cunugu maskaxdiisa meel kale u sii jeedo. Wada hadalku wuxuu u baahanyahay in midka aad la hadlayso uu kuu soo jeedo oo uu ku dhagaysanaayo.

Amaan iyo dhiirigelin

Foto: Sabine Kolmer © ROPE

Amaantu waxa ay ku xiisa gelisaa Cunuga shayga uu si fiican u awoodo. Sidaas waxay Amaantu adkaysaa isku kalsoonaanta, iyo isku faraxsanaanta naf ahaaneed ee Cunuga. Waxay ku dhiirigelisaa Jidka uu bilaabay inuu ku sii socdo oo uu ku dadaalo iyo in hawlaha uu si fiican u dhamaystiro iyo in uu balamaha iyo sharciyada ilaaliyo.

Caruurta aad ayay u dareemaan in ay amaantu si rasmi ah uga timid wadnaha iyo in kale. Erayada liiditaanku ku jiro waxay hoos u dhigaan qiimaha amaanta , Amaantiina waa ay qiimo tiraan. Tusaale: „ Si fiican ayaad Hawsha u qabatay, laakiin maxaad saan ugu daahday?“

Ha ku amaanin ama ku dhiiri gelin Cunugaada waxa adiga kuu muhiim ah oo kaliya, laakiin ku dhiiri geli oo ku amaan waxa uu asaga jecelyahay ama awoodo, si uu u hormariyo, una adkeeyo kartidiisa.

Caruurta helaa tixgelin iyo aqoonsi dheeraad ah, uma baahana ku dardaris dheeraad ah inay ku helaan tixgelin dheeri ah oo qasb ah.

Adkaynt Isku Filnaanshaha – Masuuliyad ku wareejinta

Caruurta ugu horaynba waxay isku dayaan inay isku filnaadaan oo gacmahooda wax walba ku qabsadaan. Waalidku waa waqti aad u culus oo ay u dhexeeyaan kala doorashada culayska taxadirka ee yuusan cunugaada wax gaarin iyo barbaarinta hagaagsan. Isu dheelitirka qabashada shaqo iyo da-da ku haboon ee cunuga waxay suurta gelisaa cabiraada guusha. Ku barbaarinta caruurta inay iskufilnaadaan waxay hormaraisaa isku kalsoonaanshaha caruurta.

Foto: Sven Rasch © ROPE

Sida hawl ka qabashada guriga oo ay ka mid tahay, weelal dhaqida , soo adeegida, dhir waraabinta, Xaywaanka guriga xanaanayntiisa waxay baraysaa caruurta, gabar iyo wiilba inay ayaga is qorsheeyaan oo ay masuuliyada Qoyska la wareegaan. Hadii caruurtu go aan ka gaarida hawl maalmeedka ay qabanayaan wax ku yeeshaan, waa ay jeclaanayaan hawshaas inay iyagu dhameeyaan. Sidaasna waxay ka baranayaan inay ogaadaan ama Qiyaasaan kartidooda. Taasna waxay ku sii ogaanayaan culayska ay leedahay shaqada uu qabanaayay qofka kale.

Inta badan caruurtu waa ay ku adagtahay in hawshooda ay dhameeyaan, gaar ahaan marka hawshu waqti badan u baahantahay. Halkan waxaa muhiim ah dulqaad, sababtoo ah caruurtu waxay halkaan ka baranayaan adkaysiga. Hawsha oo ay dhameeyaan waxay caruurtu ula mid tahay guul usoo hoyatay.Midaasna waxay u suurta gelinaysaa inay la wareegaan masuuliyada, xataa tan ka baxsan Qoyska.

Xuuduudaha iyo Sharciyada

Cunug walba laga bilaabo waqtiga uu dhasho waxa uu leeyahay Baahi. Caruurtu ma awoodaan inay kala gartaan in dadka kalena baahi qabaan oo ay baahidooda iyo tan dadka kale kale isu miisaamaan. Taas waa in ay bartaan, sida ay u bartaan xeerarka cayaarta iyo wada noolaanshaha. Sharciyada iyo xuduuduhu waxay ay ku hogaamiyaan caruurta iimaanka iyo tixgelinta, waxay kaloo siiyaan kalsooni iyo dulqaad.

Caruurta waxay rabaan oo ay raadiyaan waayo aragnimada iyo xuduuda. Sharcigu waa in uu u dexeeyaa dhamaan Qoyska, waana in lawada dhawraa caruur iyo waalidba, waana in si sax ah loogu wada dhaqmo oo loo dhawro. Hadii Xuduuda iyo sharciga si cad oo sax ah loogu sheego cunuga, caruurtu dhaqso ayay u fahmayaan oo oo ay ugu dhaqmayaan. Su aasha ah ma aadaysaa sariirta? Caruurtu waxy uga jawaabi karaan „haa ama maya“ laakiin aad sariirta waa hadal cad oo toos ah oon wax ku maldahnayn.

Foto: Sven Rasch © ROPE

Si sax ah u dheh Maya

Dhamaan waalidiinta waa ay yaqaanaan inay caruurtooda mar wax u diidaan ama ka mamnuucaan. Waqtiga waalidiintu ay wax diidayaan ama mamnuucayaan uma dhibyara. Waxaa muhiim ah in jawi degan iyo waqti ku haboon aad si degan ula hadasho cunuga adoo marka aad la hadlayso isha ku haya cunuga. Waxaa fiican marka aad la hadlayso inaad simantihiin oo aad u fadhiisatid ama u soo kadaloobsatid. Sharciyada iyo go aanada muhiimka ah waa in aan laga noqon oo lagu adkaystaa, xitaa hadii ay mararka qaarkood nagu adag yihiin. Waxaa muhiim ah in labada waalid isku go aan yihiin oo ay ka midaysan yihiin xeerarka in la ilaaliyo ay tahay, sabatoo ah caruurtu waxay dhihi, „hooyo hadii aadan ii ogolaan waxaan waydiisan Aabe“. Caruurta yar yar waa ay ku adagtahay inay fahmaan hadalo dhaa dheer. waxay wax ku fahmaan hadal gaaban oo toos ah, sidaas ayayna ku gartaan waxa laga sugaayo iyo waxa laga rabo.

Hab dhaqan joogta ah halkii Ciqaab ay ka noqon lahayd

Mararka qaarkood waalidiintu waxay xadka ugu dambeeya ka gaaraan korinta caruurtooda. Tusaale: Si kasto oo caruurta hadal wanaagsan loogu cel-celiyo guriga nadiifi, ma caawinayso inay bartaan in ay Guriga nadiifiyaan, inkastoo balantu sidaas ahayd. Jawaabtu waa in ay ahaado mid daba socoto hawshaas oo la yiraahdo cunuga, „waan ka xumahay, guriga nadiifintiisii waqti dheer ayay kugu qaadatay, hada barnaamijkii Telifishanka ee aad Daawan lahayd, ma lahan waqti aad ku daawato hada“ oo hada waa ku dhaafay barnaamijkii aad daawan lahayd, maadaamaa hawshii lagaa rabay ay waqti dheer oon loo baahnayn kugu qaadatay. Caruurtu sidaas ayay ku baranayaan wixii loo diray, hadii aanay samayn, jawaabta ka dambaysa ee dhacaysa, halkaasna waxay ka baranayaan in ay aygu masuuliyada qaataan. Waalidiinta waa arin marwalba ku soo noqnoqota oo ku keenta mararka qaarkood in ay caroodaan. Si fiican uga fakir marka dambe waxa ay noqonayso jawaabtu, marka uusan cunugu wixii aad u sheegtay uusan samayn. Tusaale: cunugu mar walba waxa uu boorsadiisa uu ugu jiray Tikitka baska (MOBI-Tick) uga soo tagaa Baska ama Straßenbahn ka. Marka Cunugu waa in inta ka dhiman bisha uu iskuulka ku aado ama Lug ama Baaskiil ama uu lacagtiisa jeebka ee bisha uu ku iibsadaa tikitka ama ugu yaraan uu haafkeeda asaga bixiyaa. Sidaas ayuu marka dambe si fiican uga fekeri in uusan Tikitkiisa ku dhaafin Baska.

Jawaabta ficil ee ay waalidku bixiyaan waa wax ka duwan „Ganaax“, Qaraacid, cayda, xabiska, iyo liiditaanka lagu sameeyo caruurta waa dembi, dhibaatada ama calaamadaha ay cunuga ku reebaan ee xaga jirka iyo maskaxda waxay wax wayn u dhimaan caafimaadka caruurta. Barbaarinta noocaan oo kale ah waa kuwa xun, sharci ahaana xumaantooda la adligeed lama ogolo oo waa mamnuuc.

Ha lagugu Daydo (Tusaale u noqo)

Nalka jidka oo Asagoo cas aad gudubto, adoo miiska wax ku Cunaayo oo aad wax aqrinayso, Taleefoonka oo aad ku qaylinayso ama wax ku diidayso, Caruurtu way fiirinayaan talaabo kasto oo uu waalidka samaynaayo. Caruurtu waxa ay ka bartaan fiirinta ama Hab dhaqanka, waa ay ka hayn badan yiin ama ka xasuusan og yihiin waxa loogu cel-celiyo. Waalidku qalad waa samayn karaa, laakiin waa in ay u dhaqmaan si ay Caruurtoodu urumaystaan, ee ma aha inay kala duwanaadaan waxa uu dhahayo iyo waxa uu samaynaayo.Hadii waalidku qalad gala waa in uu raali gelin ka bixiyaa, taasi waxay kor uqaadaysaa Aaminaadiisa iyo in qalad la samayn karo oo uu qofku qaldami karo, qaladkana masuulaydiisa la qaadan karo.

Cayaar, baro oo Fahan

Caruurtu waxa ay jecelyihiin inay wax walba ogaadaan, Waxay rabaan in ay wax walbaa taabtaan,fahmaan, tijaabiyaan, shay aysan aqoon ay isku haleeyaan. Laga bilaabo marka ay yaryihiin waxay tababaraan maskaxdooda, waxay balaariyaan aqoontooda, waxay sii qorsheeyaan waxa ay rabaan, waxayna dhameeyaan culaysyada iyo dhibaatooyinka ka horyimaada. Waayo aragnimo badan oo kala nooc nooc ah waxay balaarisaa aqoonta caruurta, waxayna awood siisaa inay si guul leh wax u qabsadaan.Waalidiintu waxay caruurtooda ku hormarinkaraan, marka ay u ogolaadaan in waxyaalo kala duwan uu cunugu isku dayo oo uu tijaabiyo, hawlo yar yar sida ubaxa oo uu waraabiyo, Baaskiilka oo la nadiifiyo ama weelasha oo la dhaqo!

Cayaartu uma aha caruurta (iyo waalidiintuba) farxad oo keliya, laakiin waxay kaloo muhiim u tahay waxbarashada iyo Fahamka. Sidaas la adligeed waxaa jira isku xirnaan u dhaxaysa cayaarta iyo kartida Aqooneed ee Iskuulka. Caruurtu waxay cayaarta ka urursadaan waayo aragnimo badan iyo Karti. Waxay baranayaan inay kuwa kale la balamaan, la heshiiyaan, Fekero cusub abuuraan, Dhabo cusub aadaan, Xamaasada dhawraan, inay is maqlaan, waxna isu gudbiyaan, guusha iyo guuldarada qaataan, iyo inay Sharciyada ilaaliyaan. Waxay tababarayaan xirfadahooda iyo dareenkooda, waxay baranayaan inay Feejignaadaan oo ay hal Abuurkooda isticmaalaan.

Mashruuca „Netzwerk ABBA“ waxay kaloo abuureen Hawl kale: taasi waxaa weeye Cayaarta galabtii (Spielenachmittag) oo ay ugu talakaleen Qoyska iyo Caruurta. Halkaan waxay waalidiintu Caruurtooda kula cayaarayaan Cayaaro kala duwan, sida Cayaaraha Shaxda iyo Jarada (Brettspiele) iyo Cayaaraha Orodka (Bewegungsspiele) iyo kuwa kale oo Caruurta ka caawinaya luqada iyo Eray dhihida Jarmaka. Hawshaan waa hawl ku cusbayd Kranichstein oo aad looga helay, taas oo marka uu dhamaado mashruuca ABBA weli sii socon doonta.

Dhaq-Dhaqaaqa

Hawo qaadasho la sameeyo, ayadoo Roolar ama Giraankir la wadayo, Ciid dhis, Baaskiil wadid, meelaha lagu cayaaro oo la booqdo, Cayaaraha Orodka oo la sameeyo, si wada jir ah oo socod loo sameeyo, Caruurta oo lagu qoro kooxo cayaartooy, ma siiyaan Caruurta oo kaliya Firfircooni iyo Adkaysi dheeri ah, ee waxaa kale oo uu dhaqdhaqaaqu adkeeyaa Awooda Fahanka, Feejignaanta, iyo wax qabashada maskaxda. Si uu Cunugu iskuulka wax u qori karo, si fiican Buugaagta, Qalimaanta iyo Qalbka kale u isticmaali karo, Xisaabta buuga u xisaabin karo, waxaa loo baahanyahay in Cunugu Gacmihiisa si habaysan Qalabka iskuulka u adeegsan karo. Cayaaro badan waxay u wanaagsan yihiin Gabdhaha iyo Wiilasha inay tijaabiyaan: cayaaraha gacmaha (Fingerspiele), Sawirida (Malen), Dhoobada (Kneten), Jaro boodada (Bausteine und Legos bauen), Kuul ama Tusbax dhisid (Perlen auffädeln) IWM.

Foto: Paul Czekalla © ROPE



Hawlmaalmeedka-waqtiga Firaaqada iyo caruurta: Hab dhaqan joogta ah ee Hawlmaameedka

Hab joogta ah oo loo sameeyo hawlmaalmeedka waa guusha mashquul yarida ee Qoyska, caruurtu waxay jecelyihiin qaab joogta ah, kaas oo ay isku halayn karaan. Taasi waxay siisaa Kalsooni iyo hubaal. Markasta oo si joogta ah ay qoyska hawsha u wada sameeyaan, waxay taasi keentaa mid ahaanshaha qoyska. Habkaan joogtada ah waa ay ku kala duwanaan karaan Qoysasku, laakiin waa in uu qoska farxad geliyaa, waxaana kamid ah hawlahaas joogtada ah ee la wada sameeyo sida: Cuntada oo lawada kariyo, buug ama sheeko la isu sheego, in la wada heeso, asbuuca dhamaadkiisa oo meel la wada aado.

Qorshaynta waqtiga Firaaqada

Caruur badan oo kamid ah Caruurta Aduunka ma haystaan waqti firaaqo ah. Waa in ay shaqeey-aan. Caruurta joogta jarmalka waxay haystaan ayaguna wax badan oo waajibaad ah. Waa in ay aadaan Iskuulka, waa in ay layligooda guriga ku sameeyaan iyo inay wax u bartaan Iskuulka.

Meelaha Firaaqada ku haboon waxay noqon karaan

- Meelaha xayawaanka, Shaneemo, Dabaal
- Cayaar, socod,iyo koox cayaartooy oo Agagaarkaada ku yaala oo aad isku qorto
- Jees iyo Musik, heesid
- Safar la booqdo meelaha duurduurka ah, meelaha shimbiraha iyo xayaan duurka laga maqli karo, miraha geedaha ururi IWM

Waqtiga firaaqada ah waxa uu isu dheeli tiraa waxbarasho maalmeedka. Waqtiga firaaqada micnaheedu waxaa weeye in cunuga waxa uu jecelyahay sameeyo oo waqtina u helo. Taasi samynteedu waa u jirtaa qaangaarka iyo caruurtaba. Sidaas la adligeed waxaa muhiim ah, wax Qoyska oo dhan farxadgelinaayo in la sameeyo. Mar walba oo ay caruurta waynaadaan, waxay awoodaan in ay ayagu waqtigooda Firaaqada ah qorshaystaan.

www.zoo-vivarium.de

Labada joornaal ee qoyska ee kala ah Lakritz iyo Fratz waxay soo baxaan labadii biloodba mar. Joornaal kasta oo soo baxa waxaad ka helaysaa mac luumaad la xiriira meelaha ku haboon ee waqtiga Firaaqada ah uu qoysku ku qaadan karo yio meelaha xafladaha ka jiraan ee magaalada Darmstadt iyo hareeraheeda ah. Labad joornaalba waxaad ku heli kartaa qiimo la aan. Waxaad joornaaldaan ka heli kartaa Xanaanda Caruurta, Iskuulka caruurta, Xafiisyada dadka la taliya (Bürgerberatung), dhaqtarka guriga.

Hab dhaqanka Isgaarsiinta: Telefishinka iyo kombiyuutarka

Daawashada telefishinka waa cajiib. Caruurtu waxay jecelyihiin sawirada midabka leh ee dhaqdhaqaaqaya, muusikada iyo Xamaasada. Waxaa jira Barnaamijyo wax laga barto oo leh madadaalo fiican. Caruurtu waxay barnaamijka si fiican u fahmaan, marka qof qaangaar ah uu asaga kala sheekaysto. Sidaas la adligeed waxaa fiicaan in Barnaamijyada la daawanaayo si fiican loo doorto, si ay uga mid noqdan Hawlmaalmeedka Qoyska. Caruurta in badan aydoon la ilaalinayn Telefishinka fiirsada waxay ku noolyihiin Duni xiran. Ma samyn karaan nafahaantooda waayo aragnimada ay u baahanyihiin, si ay u noqdaan Qof isku filan, Caafimaad qaba, oo firfircoon. Kombiyuutarku waa qalab muhiim u ah Iskuulka iyo Shaqada. Cayaaraha Kombiyuutarka waxay noqdeen kuwa ugu xiisaha badan waqtiga firaaqada. Laakiin waxaa muhiim ah in la helo sida ugu haboon ee loo isticmaalo, Xeerar iyo qodobo taxadir leh oo isticmaalkiisa loo dhigto. Waxaad xanaaq iyo iska hor imaad kaga hortagi kartaa, marka aad inta uusan Cunugu kombiyuutarka daarin kala hadasho, muxuu iyo meeqaa ayuu kombiyuutarka ku cayaarayaa ama ku jirayaa. Caruurta iyo dhalinyarada waqti badan ayay Internetka ku jiraan. Waxay ku kulmaan bogaga lagu wada Sheekaysto. Kala hadal cunugaada waxyaalaha in uu iska jiro ay tahay. sababtoo ah internetku ma aha wax la kontorooli karo, laakiin habka aad u isticmaalayso internetka waa la ilaalin karaa. Caruurta waa in ay u kala cadahay Qofka ay kala sheekaysanayaan internetka in uu san mar walba run sheegayn. Dadka waawayn waa in ay caruurta Arinkaas u sheegaan. sidaas la adligeed waa in aysan Caruurtu waligood magacooda rasmiga ah, dadooda, adreskooda iyo taleefoonkooda aysan waligood sheegin. Saaxiibada caruurta ee Internetka waa in qof qaangaar ah la socdaa marka ay la kulmayaan ama la balamayaan. Khatarta ka imaan kartaa aad ayay u wayntahay. Internetka oo lagu wada sheekaysto xataa aad bay qaali u noqon kartaa. Kamid noqonshada koox (Club), wax ka iibsashada internetka sida mikrafon, ama alaabo kale oo uu Cunugu internetka ka dalbado, filimo iyo muusiko oo la soo dejiyo ama duubo waa in ay dhacdaa oo keliya, marka aad adiga ogolaanshaha lagaa helo. Adiga laftaada raadso Warbixinada iyo Macluumaadka la xiriira isticmaalka Internetka oo ka caawi cunugaada in aad barto sida si wanaagsan loo isticmaalo bogaga internetka ee lagu wada xiriiro.

www.schau-hin.info (Halkan ka firi sida loo isticmaalo mediayaha)

Cunuga Iskuulka

Marka Cunug iskuul bilaabo, waxaa gebi ahaan isbedel kuyimaadaa Noolashiisa. Waxaa soo baxa Duni cusub oo xiisad wadata. Cunugaas waxa uu u yimaadaa Caruur badan, waxa uu bartaa waxyaalo badan oo cusub, oo aan ahayn sida wax loo aqriyo, qoro ama xisaabiyo. Sharciyo iyo Waajibaad cusub oo uusan horay u aqoon Cunuga ayaa nolal maalmeedkiisa xukuma. Subixii waa in uu Waqtigiisa ku tagaa Iskuulka, waa in uu hab cayiman wax u bartaa oo uu feejignaan ciyaalka kale kula shaqeeyaa. Sidaas la adligeed Cunugu ma xukumo qofka uu la shaqaynayo, kolka uu qabanayo, sabata uu u qabanayo iyo waxa uu markaas samaynayo.

Cunuga Iskuulka waxa uu haystaa firaaqo dheeri ah marka loo fiiriyo markii hore. Cunugu waxa uu kaligii gaaraa go aano, waxaa laga yaabaa in uu iskuulka kaligii tago, Alaabtiisa iskuulka uu asaga masuul ka yahay, iyo in uu waqti badan asagoo aan waalidkiis ilaalinayn keligiis joogo.

Inkastoo Cunugu isku filnaasho soo bandhigay, hadana waxa uu u baahanyahay caawimaada, feejignaanta iyo xiisaha Waalidka. Maadaamaa noolasha iskuulku aysan ku dhisnayn guul oo keliya, waxa uu Cunugu mar walba u baahanyahay, ayada oo aan loo fiirinayn kartida dhibcaha ee uu iskuulka ka keenay, Jacaylka, Fahanka, Aqoonsiga iyo Naxariista waalidka.

Maxay waalidiintu samayn karaan si caruurtu iskuulka farxad ugu qabaan oo si farxad leh wax ugu bartaan:

- Tus Xiiso, waydii waqti walba waxa cusub ee uu iskuulka kala kulmay.
- Isku day inuu Cunugu si joogta ah layligiisa guriga u sameeyay. Halkaan waxa uu Cunugu u baahanyahay meel joogta ah oouu wax ku dhigto oo aan buuq lahayn iyo waqti ku filan.
- Boorsada iskuulka oo hagaagsan waxa ay ka caawisaa cunuga in uu isha ku hayo waxa ugu jira. La samee oo la tijaabi Cunugaada sida boorsada si fiican Qalabka iskuulka loogu rido, ishana ku hay in uu wato dhamaan buugaagta iyo qalimaanta muhiimka ah iyo inay boorsadu ku culustahay.
- Fiiri in fariin muhiim ah ay la socoto boorsada ama buuga fariimaha lagu qoro ay fariin ku qorantahay ama ay warqad ku dhex jirto.
- Waqti ku filan oo jiif waa muhiim. Caruurta si fiican u seexday si fiican ayay wax u bartaan.
- Dhaqdhaqaaqu waxa uu isu dheeli tiraa ku shaqaynta miiska qoraalka.



- Waalidka iyo Iskuulku ujeedo isku mid ah ayay rabaan in ay gaaraan. Taasoo ah in ay caruurta gaarsiiyaan horumarka iyo mustaqbalka ugu wanaagsan. Sidaas la adligeed waxaa muhiim ah in waalidka iyo iskuulku ay wada shaqeeyaan.
- Raadi xiriirka macalinka iyo macalimada cunugaada.
- Uga qayb qaado si joogta ah habaynada waalidiinta ee Iskuulka, saacadaha wada hadalka iyo bandigyada warbixinada (Infomations-veranstaltungen) ee iskuulka. Taas waxay ku tusaysaa inaad xiisay-nayso horumarka waxbarasho ee cunugaada. Waxaad wax badan ka ogaan horumarka iyo waxa cusub ee iskuulka ka dhacaya, taasna waxay kuu suurta gelin in aad cunugaada waxbarashadiisa ka caawiso.
- Xeerka Iskuulka ee Hessen ayaa sheegaya sida uu waalidku uga qaybqaadan karo noolasha iskuulka. Dhamaan waalidiintu waxa ay awoodaan inay doortaan Gudiga waalidiinta Kalaasyada. Gudiga waalidiinta kalaasyaduna waxay sameeyaan Gudiga waalidiinta Iskuulka. Gudiga waalidiinta iskuulku waxay matatlaan dhamaan waalidiinta Iskuulka, waxayna wadahadal joogta ah la yeeshaan maamulaha Iskuulka. Gudiga waalidiinta ee iskuulku waa in ay ka qayb qaataan dhamaan go aanada muhiimka ah ee iskuulka.
- Hadii ay luqada kugu yartahay, sidaas la adligeena aad uga qayb-geli ladahay habaynda waalidiinta iskuulka, ama xafladaha kale ee uu iskuulku sameeyo, ama aad ka xishoonayso inaad kamid noqoto gudiga waalidiinta ee iskuulka luqada dartaad, ka hadal culayskaas. Waxaad arintaas kala xiriiri kartaa macalimiinta iskuulka, maamulha iskuulka ama Gudiga waalidiinta ee Iskuulka.



Caruurta haysata waalid ayaga aaminsan, ayaga dhiirigeliya, waxay xiiso u yeeshaan waxbarashada, Waxayna iskuulka ku qabaan farxad. Hadii ay iskuulka xiiso ku aadaana dhaqso iyo si fiican ayay wax u baranayaan.

www.eks-igs.de Erich Kästner-Schule (GS & IGS)
www.ska-darmstadt.de Schulsozialarbeit an der Erich Kästner-Schule
www.caritas-darmstadt.de Hausaufgabenhilfe an der Erich Kästner-Schule (GS)
www.fcs-da.de Freie Comenius Schule, Freie ev. Schulgemeinde e.V.

U dhaxayn gacan dabcin iyo ku xirnaansho: Xaalad gaar ah oo dhalinyarada qusaysa

Caruurtu marka ay qaangaarayaan waxa ay arkayaan sida uu jirkoodu isu badalayo. Wuxuu jirkoodu isu bedelaa sida Nin ama Naag. Wuxuu dareemaa wax cusub iyo kalsooni daro. Marka ay caruurtu qaangaarayaan waxaa dhisma nooc cusub oo dareen ah oo Quseeya shaqsi ahaan. Caruurta waxa ay is waydiiyaan waqtigaan si joogta ah maxaa igu dhacay, yaan ahay anigu, seen rabaa inaan ahaado? Markaan hal wax ayaa u cad, ma ahi caruur, mana rabaan in sidii caruur loola dhaqmo, waa dhalin yaro.

Waqtiga Qaangaarka waa waqti Xamaasad badan. Waalidiinta waxa uu ku noqdaa Imtixaan. Hadal yar oo qabow waxa uu noqon karaa qayli iyo dagaal, Hadii xitaa waalidku uu qabo dareen ah in uu markaan ka dheeraado cunugiisa, sidaan oo kale waalid ah waa loo baahdaa. Aqoonta ah in waalidku waqtiyo Culus ama qalad ku imaan karo, ayagu oo aan sumcadoodu xumaan, waxa ay dhalinyarada siisaa kalsooni.

Ha ka dhigin dhalin yarada wax waalan. Yasidu waxa ay ku dhacdaa ama dhaawacdaa ama abaartaa dareenka, waana in aan dhalin yarada loo isticmaalin iyo waliba gebi ahaan caruurta.

Waalidiinta leh caruur hada qaangaarayso waxay caawimaad iyo talo ka qaadan karaan waalidiinta kale ee Waayo-Aragnimada u leh. Taas ka sakow waxaad talo u doonan kartaan Xafiisyada waalidiinta kala taliya arimaha barbarbaarinta Caruurta.

Foto: Sven Rasch © ROPE

Hayadaha muhiimka ah ee Kranichstein

Stadtteilbüro, Stadtteilwerkstatt, Stadtteilbibliothek

Stadtteilbüro Kranichstein
Grundstraße 10 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.971180 | Email: SRK@kranich-net.de

Stadtteilwerkstatt Kranichstein
Grundstraße 21 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.981233 | Email: dorff@dw-darmstadt.de
Internet: www.diakonie-darmstadt.de [► Arbeitsbereiche ► Gemeinwesenarbeit/Migrationsdienst]

Stadtteilbibliothek Kranichstein
Bartningstraße 33 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.9671535 | Email: zweigstellen.stadtbibliothek@darmstadt.de
Internet: www.darmstadt.de [► Leben in Darmstadt ► Bildung ► Stadtbibliothek ► Standorte]

Familienzentrum Darmstadt

Bereich „Familienbildung“ (Maadoyin ku saabsan Qoyska)
Frankfurter Straße 71 | 64293 Darmstadt
Telefon: 06151.132509 | Email: fbs@darmstadt.de

Bereich „Erziehungsberatung“
(La talinta arimaha Qoyska ama dhibaatooyinka shaqsiyeed ee Qoyska)
Jakob-Jung-Straße 2 | 64291 Darmstadt
Telefon: 06151.35060

Außenstelle Kranichstein
Bartningstraße 33 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.9671528
Internet: www.familienzentrum-darmstadt.de

Jugendhäuser in Kranichstein

Jugendcafé Chillmo
Bartningstraße 26 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.9670688 | Email: info@chillmo.de
Internet: www.chillmo.de

Stadtteilpolizist

Sascha Rühl
Einkaufszentrum am See
Grundstraße 6
64289 Darmstadt
Telefon: 06151.961612
Mobil: 0172.6843833
www.polizei-hessen.de

Ökumenisches Kinder- & Jugendhaus (ÖKJH)
Bartingstraße 34 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.719364 Email:
Internet: www.oegz-kranichstein.de [▶ Kinder- und Jugendhaus]

JugendKlub Kranichstein
Jägertorstraße 179 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.77416 | Email: jkk@network-rope.org
Internet: www.jugendklub-kranichstein.de

Caritasverband Darmstadt e.V.

Migrationsdienst
Heinrichstraße 32a | 64283 Darmstadt
Telefon: 06151.999144 | Email: migration@caritas-darmstadt.de
Internet: www.caritas-darmstadt.de [▶ Beratung & Hilfe ▶ Migrationsberatung ▶ Darmstadt]

Frühberatung für entwicklungsgefährdete Kinder & ihre Familien + Spielraum
(Meelaha Qalabka lagu cayaaro laga amaahdo)
Schwarzer Weg 14a | 64287 Darmstadt
Telefon: 06151.669680 | Email: fruehberatung@... | spielraum@caritas-darmstadt.de
Internet: www.caritas-darmstadt.de [▶ Beratung & Hilfe ▶ Frühberatung ▶ Darmstadt]

Sportvereine

Turngesellschaft 1875 Darmstadt e.V.
Kranichsteiner Straße 183 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.718446 | Email: TG1875@aol.com
Internet: www.tg1875-darmstadt.de

Sportverein Blau-Gelb Darmstadt e.V.
Elisabeth-Selbert-Straße 27 | 64289 Darmstadt
Telefon: 06151.781159 | Email: vorstand@sv-blaugelb.de
Internet: www.sv-blaugelb.de

DJK-Spiel- und Sportgemeinschaft Darmstadt 1921 e.V. (DJK-SSG)
u.a. Freizeitsport für Kinder und Jugendliche in der Erich Kästner-Schule
Im Busch 11 | 64297 Darmstadt
Telefon: 06151.5990886
Internet: www.djkssgdarmstadt.de

Ururka

Netzwerk ROPE e.V.

Netzwerk ROPE e.V. ist eine unabhängige, europäisch gegründete Organisation, die im Darmstädter Stadtteil Kranichstein im Auftrag der Wissenschaftsstadt Darmstadt den „JugendKlub Kranichstein“ betreibt und darüber hinaus in verschiedenen Projekten der Bildungsarbeit für Jugendliche, aber auch für erwachsene Menschen und Kinder aktiv ist.

Unsere Ansatz ist es, (junge) Menschen zur Teilhabe an Gesellschaft zu befähigen und insbesondere diejenigen Gruppen zu unterstützen, die aus unterschiedlichen Gründen (strukturell) ausgeschlossen sind. Die Perspektive ist dabei - im erweiterten Sinne des Begriffs - „inklusiv“. Wir teilen die Vision einer Gesellschaft, in der Heterogenität als ‚Normalfall‘ akzeptiert, in der Chancengleichheit gewährleistet und das grund- und menschenrechtliche Diskriminierungsverbot verteidigt wird.

Unser Projekt „Netzwerk ABBA“ geht das Thema auf lokaler Ebene an, indem es zur Optimierung des Übergangs Schule - Ausbildung/Beruf an der Darmstädter Erich Kästner-Schule (IGS) beiträgt. Eine gute Allgemeinbildung, die Beherrschung der Kulturtechniken, umfassende soziale Kompetenzen und speziell eine sehr gute Ausbildung bzw. berufliche Qualifikation sind wichtiger denn je für die aktive Teilhabe an der wissensbasierten Arbeits- und Dienstleistungsgesellschaft. Zu viele Jugendliche schaffen den Übergang von der Schule in das ‚Leben danach‘ nicht ohne qualifizierte Unterstützung und enden in so genannten „Warteschleifen“. Die Unterstützungsangebote weiter zu entwickeln, das Zusammenspiel der (schulischen und außerschulischen) Akteure zu verbessern und insgesamt ein effizienteres „lokales Übergangsmanagement“ zu etablieren, ist Ziel dieses Projekts, das zwischen 2009 und 2012 im ESF-Bundesprogramm BIWAQ gefördert wird.

Mit dem „V.I.P.eers-Projekt“, gefördert durch die Wissenschaftsstadt Darmstadt, verfolgen wir seit 2004 eine Konzeption aufsuchender Jugendarbeit, die sich auf die Mitarbeit so genannter „V.I.P.eers“ (Very Important Peers) stützt, erfahrene, mit ‚street-credibility‘ ausgestatte Jugendliche aus dem Quartier, denen es oft leichter als z.B. (Sozial-)Pädagog/inn/en gelingt, vertrauensvolle Kontakte und tragfähige Beziehungen zu „schwer zugänglichen“ Gruppen aufzubauen.

Ein weiterer Bezugspunkt für unsere Arbeit ist die Menschenrechtsbildung. Vielfach lassen wir uns von Ideen und methodischen Innovationen unserer Netzwerkpartner im Ausland inspirieren. Über das Projekt „E.A.S.Y. - European Activities to strengthen Youth“ (2005-2008) sind wir so u.a. auf die „Lebende Bibliothek“ aufmerksam geworden, die wir seit 2010 in einem eigenen Projekt verfolgen.

Wir sind jederzeit offen für neue Mitglieder, UnterstützerInnen und Kooperationspartner. Unsere Erfahrungen in der Projektarbeit, im Design von Trainings- und Fortbildungsmaßnahmen und der Netzwerkarbeit bringen wir gerne in die Zusammenarbeit mit Ihnen ein. Kontaktieren Sie uns!

Email: info@network-rope.org | Internet: www.network-rope.org

Vereinssitz:
Netzwerk ROPE e.V.
Am Kappacker 10
64678 Lindenfels

Postfachanschrift:
Netzwerk ROPE e.V.
Postfach 10 10 07
64210 Darmstadt

Steuernummer: 005 250 93745
Finanzamt Bensheim
Vereinsregister: Darmstadt Nr. 2761

Kto. 600 200 5400
BLZ 430 609 67
GLS Gemeinschaftsbank eG

Foto: Sven Strobel © ROPE

Vereinssitz:
Netzwerk ROPE e.V.
Am Kappacker 10
64678 Lindenfels

Postfachanschrift:
Netzwerk ROPE e.V.
Postfach 10 10 07
64210 Darmstadt

Steuernummer: 005 250 93745
Finanzamt Bensheim
Vereinsregister: Darmstadt Nr. 2761

Kto. 600 200 5400
BLZ 430 609 67
GLS Gemeinschaftsbank eG